



1437 Bannock St.
Denver, CO 80202

p: 720.865.7695

JIC_news@denvergov.org

WAR SAXAAFDEED

Shaacin Degdeg ah

Isniinta, Maarso 16, 2020

XOGTII UGU DANBAYSAY EE GURMADKA MAGAALADA IYO DEGMADA DENVER AY KA SAMAYNAYAAN CUDURKA COVID-19

Denver – Duqa magaalada Michael B. Hancock ayaa maanta ku dhawaaqay xogo cusub oo muhiim ah oo la xariira gurmada Magaalada iyo Degmada Denver ee ku aadan cudurka COVID-19. Amarka waxaa sidoo kale ku jira xirista dhammaan maqaayadaha iyo baararka, marka laga reebo maqaayadaha yaryar ee garoonka diyaaradaha, ee fadhiga gudaha xarunta, ayadoona dhaqan galaysa subaxnimo maalinta Talaalada, Maarso 17, muddo sideed asbuuc ah ilaa Maayo 11. Gaynta, qaadista adeegyada darawalnimada wali way sii shaqayn karaan waana la dhiiri galinayaa. Waaxda Caafimaadka iyo Bii'ada ee Dadwaynaha Reer Denver (Denver Department of Public Health & Environment) ayaa si joogto ah ula sdocon doonta xaalada.

Amarka lasoo rogay ee wata mudooyinka cusub ee xarumuhu xirnaanayaan wuxuu daboolayaa dhammaan [iclaanadii hore ee xiritaanka xarumaha](#) the ee magaaladu soo saartay ilaa iyo hadda, wayna isbadali karaan mustaqbalka.

“Waan ognahay in talaabooyinka la kordhiyay ay saamayn ku leeyihiin nolol maalmeedka dadka, ganacsiyadeena maxaliga ahna ay waajahayaan xaalad adag, laakiin talaabooyinka waa kuwa ay qasab tahay inaan qaadno si aan qaybteena uga qaadano yaraynta dadka qaadaaya fayriska,” ayuu yiri Duqa magaalada Hancock. “Anagoo raacayna talaabooyinka dheeraadka ah, yoolkeena koobaad ayaa ahaan doona taageerida bulshooyinka nugul ee saamaynta ugu badan ku dhici doonto, iyo adeeg bixiyaasha shaqaynaaya waqtiga dheeraadka ah si ay dadkaas u caawiyaan hadda.”

Si loo taageero dadka dariska ah ee hooy la'aantu hayso, Denver waxay ka shaqaynaysaa ayadoo adeegsanaysa iskaashiyada hadda jira ee ay la leedahay adeeg bixiyaasha bulshada u shaqeeya, ayadoo si maalinle ah xariiri ula samaynaysa iskaashatada bixisa hooyada habaynkii la seexo, hooyga maalinta, isku xirka dadka wadada, guryaha taageerida oo rasmi ah, yaraynta waxyeelada, iyo daryeelida baahiyaha aasaasiga ah sida cuntada, qubayska, iyo dhar dhaqaalka. Iskaashatadaan waxay u baahan yihiin mutdawiciin, adeer bixiyaal, iyo deeqo - iyo gaar ahaan qalabka difaaca shaqsiga ah iyo qalabka nadaafada.

Dadka deegaanka ee da' yarta ah, caafimaadka qaba ee aan lahayn astaamaha xanuunka ama sifooyinka fayriska ayaa caawin kara adeeg bixiyaasha, kuwa balaaran iyo kuwa yar intaba, ayagoo ah mutadawiciin si ay uga caawiyaan diyaarinta cuntada, qaybinta alaabaha, gacana ka gaysanaaya

nadiifinta iyo ilaalinta xarumaheena si ay ugu badbaadaan martideena iyo shaqaalaheenu. Magaalada iyo Degmada Denver ayaa ayaa kala shaqaynaaya Mile High United Way si loo fududeeyo hawsha kaalmada. Booqo unitedwaydenver.org/COVID-relief.

Macquul maaha in qof kasta awoodo inuu tabarucaad toos ah sameeyo, marka koontada deeqaha ayaa horay loo diyaarshay si loo aqbalo deeqaha si looga caawiyo xarumaheena iyo adeeg bixiyaasha kale inay soo iibsadaan adeegyada aadka loogu baahan yahay. Kaliya booqo <https://secure.donationpay.org/milehighunitedway/HHSF.php> kadibna iskaashatadeena ku sugan Mile High United Way ayaa halkaasii kasii qabanaaya. Ayadoon laga eegayn intaad bixiso, bulshadu waxay kaaga mahad naqaysaa taageeradaada.

Dadka deegaanka ee doonaaya sadaqo ku baxshaan alaabaha nadaafada iyo maas garaatiyada waxay dhigi karaan Xarumaha Nasiinada ee La Alma Lincoln Park (880 Newport St) iyo Martin Luther King, Jr. (1325 W. 11th Ave.) laga bilaabo 1 - 4 galabnimo. Isniinta-Jamcada.

Magaalagu waxay ka shaqaynaysaa dookhyo kaladuwan si ay u xaqiijiso in qof kasta meel nadiif ah oo amaan ah oo uu joogo, ayna ku jiraan xarumaha guryaha magaaladu dhistay ee jira iyo xarumaha kale ee la heli karo si loo hubiyo inay boos ku filan dadka ka banaanaadaan hooyga iyo xarumaha daryeelka ee la hawlgaliyay.

Denver waxay rakibtay goobaha gacmaha lagu dhaqo dhammaan magaalada, waxayna qaybisay qariirada goobahooda. Wellness Winnie ayaa sii wada inay qaybiso boorsooyinka faya dhawrka iyo taageerada caafimaadka dhimirka.

Denver waxay sidoo kale kaashanaysaa Denver Public Schools si loo hubiyo carruurta 18 jirka ah iyo kuwa ka yar ay usii wadaan inay helaan caawimaad cunto inta dugsiyadu xiran yihiin. DPS waxay bixin doonaan quraac iyo qado bilaash ah, oo inta la qaato lala tago lana siin doono ardayda laguna bixin doono 11 goobood oo ku yaala dugsiyada magaalada oo dhan. Cashooyin ayaa lagu bixin doonaa isla qaabkaas 18 xarumood oo kuwa nasiinada ah dhammaan daafaha magaalada. Adeegga cuntadu wuxuu biloowday maanta wuxuuna socon doonaa ilaa Jamcada, Abriil 3. Si aad u hesho waqtiyada iyo goobaha, booqo webseetka DPS: www.dpsk12.org. Qof kasta oo u baahan gunooyinka cuntada ee lagu baxsho barnaamijka federaalka ee Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP, Barnaamijka Caawimaada Kaalmaatiga Nafaqada) wuxuu ka codsan karaa colorado.gov/peak.

Si aan difaac dheeri ah ugu samayso caafimaadka iyo badqabka dadwaynaha bulshada, aana gacan uga gaysano xakamaynta faafida cudurka COVID-19, laamaha gaadiidka matoorka ku shaqeeya ee Denver waa laga joojinayaa dad waynaha laga bilaabo Isniinta, Maarso 16 ilaa ogaysiis dheeraad ah la helo. Arintaan ayaa fursad siinaysa gaariyaasha aqoonsigooda diiwana galintu dhacay iyo gaariyaasha dhawaan lasoo iibsaday kuwaasoo aan wali la diiwaan galin ilaa Abriil 19, 2020 inta iclaanka Xaalada degdega ah ee Gudoomiyaha Gobalku taagan tahay. Dadka deegaanka waxaa lagu boorinayaa inay adeegsadaan adeegyada gaariyaasha matoorka ku shaqeeya ee laga heli karo www.denvergov.org/dmv.

Waaxda Booliiska ee Denver ayaa si ku meel gaar ah ugasoo bixin doonta ku xigeenada isbatoorayaasha meelaha dacwadaha si loo geco meelaha baahidu ka jirto gudaha waaxda. Waaxda, oo kaashanaysa maxkamadaha degmada iyo kordhinta badka u dhaxeeya dadka ku jira xabsiyadeena, sidoo kale xabsiyada uma diri doonaan dad lasoo xiro ee gala danbiyada heerka hooseeya, ee rabshada ah.

###